## Hay'adda Qaranka ee Xiriiradda Shaqaalaha

# ADIGA Iyo

## Falalka Qalloocan Oo Shaqada Ka Dhaca



Qoraalkan waxaa si guud loogu qeexayaa waxuu yahay Guddiga Qaranka ee Xiriirada Shaqaalaha iyo waxuu ka qabto cabashada la xiriirta falalka gurracan ee ka dhaca goobta shaqada..Inkastoo aysan qoraalkan ku sugnayn jawaabta su'aal kasta haddana waxaad ka heli kartaa macluumaad aad waxtar kuugu yeelanaya.

---

## Maxuu Yahay

## Guddiga Qaranka ee Xiriirada Shaqaalahu(NLRB)?

---

Waxaan nahay hay'ad dhexe oo loo aasaasay jnay meelmariso Xeerka Qaranka ee Xiriirada Shaqaalaha(National Labor Relations Act, NLRA)

Sida Hay'ad madax bannaan, ma hoos imaanno hay'ad kale ee xukuumadda ah – sida Wasaarada Shaqada.

---

## Maxay Tahay Xuquuqdaada Haddaad Tahay Shaqaale Hoos Yimaada Xeerka NLRA?

---

Markaad tahay shaqaale hoos yimaada xeerka NLRA waxaa xuquuqdaada ka mid ah:

Dhisid, ama isku deyid inaad urur-shaqaale ka dhex-dhistid xoogsatada shaqaalaha la shaqeysid.

Inaad ku darsantid urur-shaqaale, ha aqoonsanaado loo-shaqeeyahaaga ama yuusan aqoonsanaan.

Inaad gacan ku siisid urur-shaqaale abaabulka shaqaalaha goobta aad ka shaqaysid.

Inaad ka qayb qaadatid hawlaha kooxeed oo sharciga waafaqsan. Guud ahaan, “hawl kooxeed oo sharciga waafaqsan” waa hawl kooxeed oo lagu raadinayo wax-ka-beddelka mushaarka ama xaaladda shaqada.

Inaad diido inaad samaysid mid ama dhamaantood arrimaha kor lagu xusay. Si kastaba ha ahaatee, ururka shaqaalaha iyo loo
shaqeeha, oo ku sugan Gobol laga oggolyahay heshiisyadan, waxay sharci ahaan wada geli karaan qodobka amni-urur shaqaale (union-security clause) oo shaqaalaha ka dalbaya inay ku darsamaan
ururka shaqaale.

Xeerka NLRA waxuu kaa reebayaa loo-shaqeyayaasha inay fara-geliyaan, hor-istaagaan, ama shaqaalaha ku qasbaan inay isticmaalaan xaqooda la xiriira is-abaabulka, dhisidda, ku darsamida ama gacan-siinta urur-shaqo ulajeeddada koox-u-gorgortanka, ama ka qayb-galka hawl kooxeed, ama ka hor-istaagid mid kastoo hawlahaas ah. Sidoo kale, ururrada shaqada kama hor-istaagi karaan ama kuma khasbi karaan shaqaalaha isticmaalka xuquuqdooda.

**Dhaqammada Loo-shaqeeyaha oo Jabinaya Xeerka NLRA Waxaa Ka mid ah:**

Shaqaalaha oo lagu handado inay luminayaan shaqadooda ama dheefta kale hadday ku darsamaan
ama u codeyaan urur-shaqaale ama ka qayb galaan hawlo kooxeed oo xeerka waafaqsan

Handadaad in la xiri doono warshadda ama goobta shaqada hadday shaqaaluhu doortaan urur shaqaale oo matala

Shaqaalaha oo la waydiiyo urur shaqaale ay

u beer-dulucsan yihiin, ama falal faragelinaya hawlaha shaqaalaha, hor-istaagaya ama ku khasbaya isticmaalka xuquuqdooda ku cad xeerka NLRA.

Shaqaalaha oo loo ballan qaado dheef si looga qalbi-jebiyo inay taageeraan urur-shaqaale

Shaqaalaha oo goob-shaqo kale loo beddelo, shaqada oo laga fariisiyo, laga saaro shaqada ama loo wareejiyo mid adag maadaama ay ka qayb galeen hawlo kooxeed oo xeerka waafaqsan

Shaqaalaha oo loogu hanjabo inay luminayaan shaqada haddaysan taagerin hawlaha ururka shaqaale

Iyadoo la diido in wax laga qabto cabasho uu soo gudbiyey shaqaale sababtoo ah inuu dhaliilay saraakiisha ururka shaqaale

La ganaaxo shaqaale si xeerka waafaqsan uga baxay ururka shaqaale markuu adeegsaday xaqa iska-casilidda oo xeerka waafaqsan.

La raadiyo sii-daynta shaqaale aan oggolaan heshiiska dukaanka iyo ururka shaqaale, isagoo shaqaaluhu bixiyey ama ogoolaaday inuu bixiyo kharash xeerka ku salaysan iyo mid wakhtiyaysan

La diido in shaqaalaha laga warbixiyo ama laga eexdo shaqo qoridda taasoo ku salaysan jinsiyadda ama hawlaha urur-shaqaale



## Waxa Aannaan Samayn

Annagu ma dhaqangelino meelmarka---

Xeerarka dhexe oeekala duwan oo hoos yimaada Awoodda Wasaaradda Shaqada. Waxaa ka mid ah:

Xeerka Shaqada loo simananyahay (Fair Labor Standard Act)
Xeerarka Kala Duwan Mushaar Deyn U Goynta (Wage Garnishment Provisions of Various Statute)
Xeerka Heshiisyada Guud (Public Contracts Act)
Xeerka Heshiiska Adeega (Service ContractbAct)
Davis-Bacon iyo Xeerarka la Xiriira (Davis-Bacon And Related Acts)
Xeerka Heshiiska Saacad Goosatada iyio Heerka Badbaadka (Contract Work Hours and Safety Standards Act)

Xeerarka kala duwan ee gobolka oo la xiriira shaqaynta. Waxaa ka mid ah:

Xeerarka Mag-dhawga Shaqa La'aanta (Unemployment Compensation Statutes)
Xeerarka Magdhawga Workman (Workman's Compensation Statutes)
Xeerarka Isku-midnaanta Shaqaynta (Equal

Eplooyment Statutes)

Xeerar kala duwan oo hoos yimaada awoodda Guddiga Isku-midnaanta Fursadda Shaqaynta (Equal Employ-Ment Opportunity Commission).

HADDAAD QABTID SU'AAL KASTA OO KU SAABSAN XIRIIRKA SHARCIYADA AY LA LEEYIHIIN HAY'ADDAYADA AMA SAAMAYNTA SHARCIYADA ARRINTAADA, FADLAN LA SOO XIRIIR SARKAALKA SOO-DHAWEYNTA.

## Ma Lagaa Saaray Damaanada Xeerka ee NLRA?

Xeerka NLRA waxuu damaanada si cad uga saarayaa dadkan :

- Loo shaqaaleeyey xoogsato beeraley ah
- Loo shaqaaleyey adeegg guri qof ama qoys
- Loo shaqaaleyey waalid ama xaas
- Loo shaqaaleyey iskiis-u-madax bannaan
- Loo shaqaaleyey horjooge
- Loo shaqaaleyey loo-shaqeeye hoos yimaada Xeerka ShaqadaTareenada sida tareenada iyo dayaaradaha (Railway Labor Act)
- Loo shaqaaleyey maamullaha dhexe, ee gobollada ama deegaanada
- Loo shaqaaleyey cid kasta oo aan ahayn loo-shaqeeye sida ku cad Xeerka Qaranka ee Xiriirrada Shaqaalaha(NLRA)

HADDII AAD QABTID WAX SU'AAL AH OO KU SAABSAN INAAD KA BAXSAN TAHAY DAMAANADA NLRA, FADLAN LA SOO XIRIIR
XAFIISKA SOO-DHAWEYNTA

---

## Goormaan Tallaabo Qaadnaa?

---

Sarkaalkayaga Soo-dhaweynta diyaar buu kuu yahay inuu kaala hadlo haddaad doonaysid inaad Hay'addan weydiisid arrrimo shaqadaada ku lugleh. Sarkaalka Soo-dhaweynta waa xirfad-yaqaan waayo aragnimo dheer u leh baarista cabashooyinka ku saabsan dhaqammada aan loo sinayn ee goobta shaqada ka dhaca. Sarkaalka Soo-dhaweynta waxaa lagula xiriiri karaa taleefanka, boostada caadiga ah ama qof ahaan si aad kala xaajootid arrimaha aad damac-santahay inaad soo hor-dhigtid Hay'adda. Sarkaalka Soo-dhaweynta waxuu ku siin karaa macluumaad kuu suurta geliya inaad go'aan ka gaartid arrinta soo gudbinta cabashada ku saabsan dhaqanka aan loo sinayn ee goobta shaqada.

Nuqulka cabashada waxaa la siinayaa loo-shaqeeyaha ama ururka shaqaale oo cabashadu ku saabsan tahay.

Markii cabashada la xereeyo, ayaan annagu kaa guddomaynaa wixii aad cashada ku caddeyn. Qabashada caddeynta, ay ka mid tahay oraah dhaarsan, waxay dhici kartaa isla marka aad cabashada xerayn. Haddaysan taasi dhicin waxaa muddo gaaban gudaheed xeraynta kaddib kula soo xiriiri wakiil Guddiga NLRB si uu kaaga qabto caddaynta aad cabashada ku taagaysid.

Haddii la soo gudbiyo caddayn waafi ah oo keenaysa sii-wadidda baarista cabashada, wakiilka Guddiga arrintaada loo-xilsaaray ayaa la xiriiri markhaatiyada kale oo arrinta macluumaad muhiim ah ka haya iyo loo-shaqeyaha ama ururka shaqaale oo edaynta ku lugleh.

Baarista arrinta kaddib, waxaa dib loo eegi caddaynta. Haddii ay muuqato inuusan dhicin wax ku xadgudub ah Xeerka NLRA, wakiilka Guddiga waxuu kaa dalbayaa inaad cabashada la noqotid. Haddaad diidid la noqoshada, Xafiiska Gobolka ayaa tirtiraya cabashadaada. Markaas kaddib waxaad yeelan fursad, haddaad doontid, aad Xafiiska Racfaanka ee Washington, D.C aad dacwad uga qaadan go'aankii Xafiiska Gobolka.

Haddayse, markii dib loo eego, caddaynta muuqato inuu dhacay xad-gudub, waxaa laga dalbayaa lo-shaqeyaha

ama ururka shaqaale oo edaysan inuu daaweyo xad-gudubka. Haddii dhinaca edaysan diido inuu iskiis u daaweyo arrinta, waxaa la soo saari ashtako rasmi ahaan lid ku ah, arrintana waxaa loo gudbin dhegaysiga Xaakimka Qaanuunka Maamulka. Inta uu socdo dhagaysigan waxaa la soo bandhigi wixii caddeyn ah oo lagu ayidi ashtakada. Dhagaysiga Xaakimka Qaanuunka Maamulka hortiisa iyo dib-u-eegidda arrinta ee Guddiga ama Maxkamadaha Maraykanka ayaa qeexi doona, hadday jirto, wixii aad ka heli daaweynta cabshada xad-gudubka..

## Xafiisyada NLRB

Canaawiinta xafiisyada waxaa laga heli karaa liiska diiwaanka taleefannda hoosta United States Government-National Labor Relations Board.

Cinwaanka iyo taleefanka xafiiska kuugu dhow waa: